

# Maktabada Degmada Dakota

## Kheyraadka ee loogu talagalay waxbarashada K-12

### Isticmaal kaarka maktabadaada

#### **Kaarka maktabada onleenka ah**

Iska diiwaangeli kaarka maktabadda khadka tooska ah oo isla markiiba marin u hel macluumaad elektaroonig ah, oo ay ku jiraan buugaagta elektaroonigga ah, buugaagta maqalka ah iyo waxyaabo kale oo badan.

#### **Kaarka ardayda**

Iskuulada kaqeyb galaya barnaamijkeena kaarka ardayda, lambarka sedexda dhijit ah ee degmada dugsigaaga oo uu la socdo aqoonsigaaga ardayga ayaa waxay marin degdeg ah ku siinayaan inaad isticmaasho kheyraadka maktabada onleenka ah.

### Booqo maktabada

#### **Adeegyada khaaska ah ee maktabada**




Tag maktabadda si aad u ogaato oo aad u hubiso waxyaabaha yaala ama aad u isticmaasho kombuyuutar. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa adeegga qaadashada alaabta aad gadatay adigoo gaariga ka deign “Curbside Pick-up” si aad u soo qaadato agabyada, ama waxaad buugaagta ku codsataa in lagugu soo diro adeegga Boostada haddii aadan awoodin inaad booqato maktabadda.

#### **Isticmaalka kumbiyuutarka & Wi-Fi**

Kumbuyuutarrada, qalabyada daabacaada iyo iskaanka ayaa laga heli karaa in lagu isticmaalo dhammaan goobaheenna, looma baahna kaarka maktabadda. Waxaad sidoo kale soo qaadana kartaa qalabkaaga oo aad ku isticmaali kartaa Wi-Fi-geena bilaashka ah si aad internetka uga isticmaasho goobaha baarkinka ee maktabadda.

#### **Agabyada iyo buugaagta maktabada**

Internetka ka raadi oo hubi buugaagteena, buugaagta luuqadaha aduunka, macluumaad loogu talagalay kuwa barta luuqada Ingiriiska, buugaag maqal ah iyo waxyaabo kale oo badan.



# Maktabada Degmada Dakota

## Kheyraadka ee loogu talagalay waxbarashada K-12

### Wax ka baro khadka tooska ah

**Waxbarida iyo ka caawinta shaqada guriga ee khadka tooska ah** HelpNow waxay bixisaa caawimaad dhanka shaqada guriga iyo waxbarid khadka tooska ah kuwaas oo loogu talagalay carruurta dhigata fasallada K-12 iyo kuleejka. Macallimiinta ayaa la heli karaa laga bilaabo 1-11pm maalin kasta.

### Caawimaada FAFSA

Caawinta FAFSA ee khadka tooska ah ayaa laga heli karaa HelpNow si loo caawiyo qof kasta oo caawimaad uga baahan buuxinta foomka FAFSA ee kaalmada dhaqaale ee ardayda.

### Kheyraadka/macluumaadka dhijitaalka ah

Ogow noocyada kala duwan ee kheyraadeena dhijitaalka ah ee marin kuu siiya imtixaanada lagu tababarto, barashada luqadda, keydka macluumaadka iyo waxyaabo kale oo badan.

**Buugaagta khadka iyo buugaagta maqala (e-books, e-audiobooks)** Internetka ka baar buugaag badan oo ah e-books iyo waxyaabo kale oo badan oo dhijitaal ah adigoo isticmaalaya Cloud Library, Tumblebooks, BookFlix and adeegyada kale ee bilaashka ah.

### Wax la baro Lynda

Daawo fiidiyowyo tababar ah oo laga helo Lynda si aad u barato xirfado kala duwan iyo sooftiwero ay ka mid yihiin iMovie, qaabeynta 3D, koodh-gareyn, naqshadeynta cayaaraha iyo waxyaabo kale oo badan.

### Barnaamijyada khadka tooska ah

Barnaamijyadeena khadka tooska ah waxaa ka mid ah mawduucyo waxbarasho oo kala duwan oo ay ka mid yihiin storytimes, STEM, dabciga, farshaxanka iyo waxyaabo kale oo badan.

Wixii macluumaad dheeri ah, booqo [www.dakotacounty.us/library](http://www.dakotacounty.us/library), raadi *K-12*.

Wixii su'aalo ah? limayl noogu soo dir [askalibrarian@co.dakota.mn.us](mailto:askalibrarian@co.dakota.mn.us)



brainfuse

HelpNow

lynda.com



CloudLibrary

eBooks & eAudiobooks



DAKOTA  
COUNTY  
LIBRARY